

**FAAFIN**  
الرسمية



**RASMI AH**  
الجريدة

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sannadka 3aad Muqdisho, 20 Junyo 1975

L. 2, R. 6

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

**FAAFIN BIL SOO BAXA**

جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibadedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

**KOBNIIN**

**BOGGA KOWAAD**

**SHARCI**

**W. M.**

**BOGGA LABAAD**

**XEER**

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKAN,** Tr. 11 Marso 1974, L. 85 — *Xubno Joogta ah ee Shaqaalaha Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta.*

Bog. 507

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA,** Tr. 1 Abril 1975, L. 86 — *Dallacsiin Saraakiil Boolis ah.*

» 514

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA,** Tr. 9 Junyo 1975, L. 87 — *Xeer lagu oggolaanayo Cusbooneysiin Ruqsad Maacdan Baarista ee Shirkadda Nucleare Somala.*

» 515

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA,** Tr. 14 Abril 1975, L. 88 — *Billad Maar ah oo Hawlkarnimo ee lagu Maamuusay Shirkadda C. A. T. (Contracting and Trading Company)*

516

- XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, Tr. 14  
Junyo 1975, L. 89 — *Magacaabidda Guddiyada Ka-  
caanka ee Gobolka Sanaag Qaybahooda Wakiilada  
Beesha.* Bog. 517
- XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, Tr. 14  
Junyo 1975, L. 90 — *Magacaabidda Guddiyada Ka-  
caanka ee Gobolka Togdheere Qaybahooda Wakkiildada  
Beesha.* » 520
- XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 30 Marso  
1975, L. 91 — *Dhul Dawladeed la siiyay gacantana loo  
geliyay Jaalle Xaaji Maxamed Cabdulle Wardheere mq.  
351, Cad dhul Dawladeed la siiyay Jaalle Maxamuud  
Geedi Maxamuud mq. 378.* » 522
- XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 26 Majio  
1975, L. 92 — *Qaadid Korontada Degmada B. Burte  
dan guud awgeed ee waqti hore uu lahaa Maxamed  
Axmed Saalax ay la wareegtay Wakaaladda Xoogga  
Korontada Ummadda.* » 524
- XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 27 Majio  
1975, L. 93 — *Cad dhul Dowladeed la siiyay Jaalle Sa-  
ciid X<sup>af</sup>ji Bilcil iyo Ismaciil Xaaji Maxamed Muusa ku  
yaal Muqdisho, Jidka Afgooye kuna fadhiga mq. 3460.* » 525

## BOGGA SADDEXAAD

### TALOOYIN ISGARS/IN OGEYSIIS IYO WAXII LA MID AH

- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 16 Junyo 1975,  
Naada Dhul — *Jaalle Maxamed Xaaji Saciid.* (96) Bog. 526
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 16 Junyo 1975,  
Naada Dhul — *Jaalle Bibi iyo Binti Xaaji Abuubakad  
Xaaji.* (97) » 527
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 16 Junyo 1975,  
Naada Dhul — *Jaalle Xaaji Maxamed Guuled Cabdi.*  
(98) » 527
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 16 Junyo 1975,  
Naada Dhul — *Jaalle Xuseen Yuusuf Maxamuud.* (99) » 528
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 16 Junyo 1975,  
Naada Dhul — *Jaalle Xuseen Xaaji Maxamed.* (100) » 528
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 16 Junyo 1975,  
Naada Dhul — *Jaalle Maxamed Xuseen Ibrahim.* (101) » 529
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 4 Junyo 1975  
Khalad Bixin — *Naada Dhul.* (102) » 529

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**

Tr. 11 Marso 1974, L. 85.

Xubno Joogta ah ee Shaqaalaha Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta.

**MADAXWEYNAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA**

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo 2aad ee Kacaanka Sharcigii L. 1 soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharcigii tiradiisu ahayd 14 ee soo baxay 3dii Juun 1962 kuna saabsanaa dhismaha Guud ee Dawladda;

ISAGOO ARKAY Xeerkaa D.P.R. soona baxay 20kii Maarso 1965kii L. 17;,,,

WAXAA Lagama maarmaan ah in la aqbalo is beddelkaan Dhismaha cusub ee ku saabsan Xubnaha Joogtada ah ee Shaqaalaha Wasaaradda Karsoorka iyo Diinta;

**DAKREETO:**

**Qodobka 1aad**

Qaabkii iyo Jagooyinkii ee Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta iyo Xafiisyada ku xidhidha ay la higelinayaa sida ku cad xaashiyaha halkan ku lifaaqan ahna qayb xeerkan ka tirsan.

**Qodobka 2aad**

Wixi aan la socon xeerkan ee ka hor imanaya waa la baabiyey.

**Qodobka 3aad**

Xeerkani waa innu dhakhso uga mid noqdaa Sharciyaasha iyo Xeerarka Dawladda Gumhuuriyadda Dimuquraadiga Soomaaliyeed, xaashida Dawladda ee rasmiga ahna ku soo baxaa.

Muqdisho, 11 Marso 1974.

**MADAXWEYNAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA**

*Jaalle Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Wasaaradda Garsoorka iyo Diinta

*VISTO e registrato - Reg. n.2, foglio n. 27.*

*Mogadiscio, li 21 Marzo 1974.*

*Il Magistrato ai Conti:*

Magg. ABDULLAHI WARSAME NTIP

**SOO KOOBIDDA JAGOONYINKA EE GO'AAXIKA IYO DARA/LADA  
WASARADDA GARSOORKA IYO DIINTA**

	A2	A3	A4	A6	A	Isugayn		B	B	C9	C	C	Isug.	Isug.	Isug.	Isugayn	
						A	B7										
Wasaradda Garsoorka iyo Diinta																	
Xafiiska Agaasimaha Guu	1				1	2				1	1	2					
Xafiiska Waaxda Garsoorka iyo Xirf.		1	1	3		5	4	4		8	8	8					1
Xafiiska Waaxda Diinta ee Wasaradda Gars. iyo Diinta		1	1	5		7	3	6	9	7	7	7					2
Xafiiska Waaxda Xeer Dajinta		1	1	2	5	9	2	2	4	4	4	4					1
Xafiiska Waaxda Maamulka		1	1	4		6	4	10	14	19	19	250					28
Lacagta Was. Gars. iyo Diinta																	
Xafiiska Waada Xabsiyada Wasaradda Gars. iyo Diinta	1	1	1	3	3	8	4	14	18	109	109	42					17
Isugayn Jagooyinka	1	5	5	17	9	37	17	32	49	1	148	149	292				5

**HABKII IYO QAABKII  
WASAARADDA GARSOORKA IYO DIINTA**

<i>L. Jagada</i>	<i>Habka iyo Jagada</i>	<i>Xirfa</i>	<i>Dar. Qaab</i>	
------------------	-------------------------	--------------	------------------	--

**XAFIISKA AGAASIMAHA GUUD**

2-0001	Agaasimaha Guud	Maamulka	A2	1
2-0002	Xoghayaha Gaar ahaaneed Xa- fiiska Xoghayaha Isud.	Maamulka	A	1
2-0003	Xoghayaha Gaar ahaaneed Xa- fiiska Agaasimaha Guud	Garaani	C9	1
2-0004	Makiinad Garaac	Garaani	C	1

**XAFIISKA WAAXDA GARSOORKA IYO XIRFADA**

2-1001	Agaasimaha Waaxda	Maamulka	A3	1
2-1002	Makiina Garaac	Garaani	C	1

**XAFIISKA XUBINTA GARSOORKA IYO XIRFADA**

2-1003	Madaxda Xubinta	Maamulka	A5	1
2-1004	Makiina Garaac	Garaani	C	1

**XAFIISKA LAANTA GARSOORKA**

2-1005	Madaxda Laanta	Maamulka	A6	1
2-1006	Sargaal Fuliye ah	Caawiye	B7	1
2-1007-8	Makiina Garaac	Garaani	C	2

**XAFIISKA LAANTA XIRFADA**

2-1009	Madaxda Laanta	Maamulka	A6	1
2-1010	Sargaal Fuliye ah	Caawiye	B7	1
2-1011-12	Makiinad Garaac	Garaani	C	2

**XAFIISKA LAANTA HORUMARINTA BAARISTA  
IYO TIRO KOOBIDA**

2-1013	Madaxda Laanta	Maamulka	A6	1
2-1014-15	Sargaal Fuliye ah	Caawiye	B7	2
2-1016-17	Makiina Garaac	Garaani	C	2

<i>L. Jagada</i>	<i>Habka iyo Jagada</i>	<i>Xirfa</i>	<i>Dar. Qaab</i>	
------------------	-------------------------	--------------	------------------	--

XAFIISKA WAAXDA DIINTA EE W. G. IYO DIINTA

2-2001	Agaasimaha Waaxda	Maamulka	A3	1
2-2002	Makiina Garaac	Garaani	C	1

XAFIISKA XUBINTA ISKU XIRIDDA LAAMAHA DIINTA

2-2003	Madaxda Xubinta	Maamulka	A5	1
2-2004	Sargaal Fuliye ah	Caawiye	B7	1
2-2005	Makiinad Garaac	Garaani	C	1

XAFIISKA LAANTA AWQAAFKA

2-2006	Madaxda Laanta	Maamulka	A6	1
2-2007	Sargaal Fuliye ah	Caawiye	B7	1
2-2008	Makiinad Garaac	Garaani	C	1

XAFIISKA LAANTA MEELAHA XURMADA DIINTA

2-2009	Madaxda Laanta	Maamulka	A6	1
2-2010	Sargaal Fuliye ah	Caawiys	B	1
2-2011	Makiina Garaac	Garaani	C	1

XAFIISKA LAANTA HANUUNTA IYO WACDIGA

2-2012	Madaxda Laanta	Maamulka	A6	1
2-2013	Saraakiil Fuliyeey ah	Caawiye	B	1
2-2015	Makiina Garaac	Garaani	C	1

XAFIISKA LAANTA  
XIRIIRKA ISLAAMKA IYO UMMADAHA KALE

2-2016	Madaxda Laanta	Maamulka	A6	1
2-2017	Sargaal Fuliye ah	Caawiye	B	1
2-2018	Makiina Garaac	Garaani	C	1

XAFIISKA LAANTA  
AKHRISKA DIINTA IYO FAAFINTEEDA

2-2019	Madaxda Laanta	Maamulka	A6	1
2-2020	Sargaal Fuliye ah	Caawiye	B7	7
2-2021-22	Sargaal Fuliye ah	Caawiye	B	2
2-2023	Makiina Garaac	Garaani	C	1

<i>L. Jagada</i>	<i>Habka iyo Jagada</i>	<i>Xirfa</i>	<i>Dar. Qaab</i>	
------------------	-------------------------	--------------	------------------	--

XAFIISKA WAAXDA XEER DAJINTA

2-3001	Agaasimaha Waadaxda	Maamulka	A3	1
2-3002	Sargaal Fuliye ah	Caawiye	B7	1
2-3003	Makiina Garaac	Garaani	C	1

XAFIISKA XUBINTA ISKUDUBBARIDKA XEER DAJINTA

2-3004	Madaxda Xubinta	Maamulka	A5	1
2-3005	Garyaqaan	Xirfadya	A	4
2-3009	Isku bedela Af Talyaani iyo			
	Ingiriisida	Caawiye	B	1
2-3010	Makiina Garaac	Garaani	C	1

XAFIISKA LAANTA BAARISTA SHARCIYADA

2-3011	Madaxda Laanta	Maamulka	A6	1
2-3012	Beddale Tegnika ah	Caawiye	B	1
2-3013	Makiina Garaac	Garaani	C	1

XAFIISKA LAANTA  
ARUURINTA IYO SOO SAARIDDA SHARCIGA

2-3014	Madaxda Laanta	Maamulka	A6	1
2-3015	Saraakiil	Maamulka	A	1
2-3016	Sargaal Fuliye ah	Caawiye	B7	1
2-3017	Makiina Garaac	Garaani	C	1

XAFIISKA MAAMULKA LACAGTA W. G. IYO DIINTA

2-4001	Agaasimaha Waaxda	Maamulka	A3	1
2-4002	Makiina Garaac	Garaani	C	3

XAFIISKA XUBINTA MAAMULKA LACAGTA

2-4005	Madaxda Xubinta	Maamulka	A5	1
2-4006-8	Makiinad Garaac	Garaani	C	3

XAFIISKA LAANTA ARKIIBIYAHA IYO ALAABTA

2-4009	Madaxda Laanta	Maamulka	A6	1
2-4010	Sargaal Fuliye ah	Caawiye	B7	1
2-4011-14	Sargaal Fuliye ah	Caawiye	B	4
2-4015-18	Makiinad Garaac	Garaani	C	4

<i>L. Jagada</i>	<i>Habka iyo Jagada</i>	<i>Xirfa</i>	<i>Dar. Qaab</i>
------------------	-------------------------	--------------	------------------

**XAFIISKA LAANTA XISAABAADKA**

2-4019	Madaxda Laanta	Maamulka	A6	1
2-4020	Sargaal Fuliye ah	Caawiye	B7	1
2-4021-22	Sargaal Fuliye ah	Caawiye	B	2
2-4023-25	Makiinad Garaac	Garaani	C	3

**XAFIISKA LAANTA MIISAANIYADDA**

2-4026	Madaxda Laanta	Maamulka	A6	1
2-4027	Sargaal Fuliye ah	Caawiye	B7	1
2-4028-29	Sargaal Fuliye ah	Caawiye	B	2
2-4030-32	Makiinad Garaac	Garaani	C	3

**XAFIISKA LAANTA SHAQAALAHA**

2-4033	Madaxda Laanta	Maamulka	A6	1
2-4034	Sargaal Fuliye ah	Caawiye	B7	1
2-4035-36	Sargaal Fuliye ah	Caawiye	B	2
2-4037-39	Makiinad Garaac	Garaani	C	3
2-4040-289	Adeege oo ka dhexeeya Wasaaradda Garsoorka iyo Arr. Diinta oo idil, ha ahate xagga Maamulka Guud ahaaneedba Garsoorka hase ahaato xagga ah	Shaq. Hoose	D	250

**XAFIISKA WAAXDA WASAARADDA GARS. IYO DIINTA**

2-5001	Agaasimaha Waaxda	Maamulka	A3	1
2-5002	Makiinad Garaac	Garaani	C	1

**XAFIISKA XUBINTA**

**ISKUDUBBARIDKA WAAXDA XABSIYADA**

2-5003	Madaxda Xubinta	Maamulka	A5	1
2-5004	Sargaal Fuliye ah	Caawiye	B7	1
2-5005-6	Sargaal Fuliye ah	Caawiye	B	2
2-5007	Makiinad Garaac	Caraani	C	1



<i>L. Jagada</i>	<i>Habka iyo Jagada</i>	<i>Xirfa</i>	<i>Dar. Qaab</i>
------------------	-------------------------	--------------	------------------

XAFIISKA LAANTA

BAARISTA XAB. IYO KRIMINOOLJIGA

2-5008	Madaxda Laanta	Maamulka	A6	1
2-5009-11	Saraakiil aqoon u lah cilmiga minoolojiga	Xirfad yaq.	A	3
2-5012	Sargaal Fuliye ah	Caawiye	B7	1
2-5013-14	Sargaal Fuliye ah	Caawiye	B	2
2-5015	Makiinad Garaac	Garaani	C	1

XAFIISKA LAANTA WARSHADA IYO BEERAHA

2-5016	Madaxda Laanta	Maamulka	A6	1
2-5017	Sargaal Fuliye ah	Caawiye	B7	1
2-5018-25	Saraakiil Sancayaqaanyaal ah	Tegniko	B	8
2-5026-125	Sanacayaqaaniin	Tegniko	C	100
2-5126-140	Ilaaliyaal	Shaq. Hoose	D	15

XAFIISKA LAANTA XANNANADA CARRUURTA

2-5141	Madaxda Laanta	Maamulka	A6	1
2-5142	Sargaal Fuliye ah	Caawiye	B7	1
2-5143-144	Saraakiil Hoose	Caawiye	B	2
2-5145-150	Kokayaal	Tegniko	C	6
2-5151-165	Dhardhaqayaal	Shaq. Hoose	D	15
2-5166-177	Ilaaliyaal	Shaq. Hoose	D	12

**XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**

Tr. 1 Abril 1975, L. 86.

Dallacsiin Garsoorka iyo Diinta.

**MADAXWEYNAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA**

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Qodobka 5aad (lambarka 4aa) ee sharciga ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliiska lana soo saaray 23kii disembar 1972, kuna lambarasan 2;

ISAGOO KU AMRAY Warqaddii lambarkeedu ahayd XGM-GSK 1-308, taariikhdeeduna ahayd 31 Maarso 1975 ee Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka uguna soo xogwarramay Saraakiil ka mid ah Ciidanka Booliska isagoo soo amray in la dallacsiyo;

ISAGO TIXGELIYEEY Dadaalkii aq ka geysteen Ololaha Horumarinta Reer Miyiga ee uu soo jeediyey Guddiga Dhexe ee O.H.M.R.!

ISAGOO DHEGEYSTAY Taladii uu soo jeediyey Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

**WUXUU XEERAY**

Qodobka 1aad

In Saraakiisha magacyadoodu hoos ku qoran kana tirsan Ciidanka Booliska la dallacsiiyay, lana gaarsiiyey darajada ku Sarkaal walba hortiiisa, mark billaabo 1da Abriil 1975, kuna hirgeleysa xagga sharciga iyo dhaqaalaha uu muteystay awgiis (merito eccezionale).

1. Dhamme Xusxn Rooble Siyaad, waxaa loo dallacsiiyey darajada Gaashaanle;

2. Xiddigle Jaamac Khayre Waceys, waxaa loo dallacsiiyey darajada Laba-Xiddigle.

Qodobka 2aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelay, waxaana lagu dhigi doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 1 Abril, 1975.

MADAXWEYNA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA  
*S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda  
Arrimaha Gudaha  
*S. Gaas Jaamac Maxamed Qaalib*

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda  
Maaliyadda  
*Dott. Cabdiraxmaan Nuur Xirsi*

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY

*Diiwaanka lamb. 3, bogga lamb. 107.*  
*Muqdisho, 12 Junyo 1975.*  
G. Dhexe Cabdillahi Warsame Nuur

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

T. 9 Junyo 1975, L. 87.

Xeer lagu oggolaanayo cusbooneysiin Ruqsad Macdan Baarista ee Shirkadda Nucleare Somala.

GUDDOONSHAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKU ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

MARKU ARKAY Heshiiskii Dawladda Soomaaliyeed ay la saxiixatay Shirkadda kor ku xusan taarikhdu markey ahayd 5tii Disembar 1968;

MARKU ARKAY Taladii Xoghayaha Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha;

ASAGO ARKAY Go' aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha.

## WUXUU XEEREYNAA

### Qodobka 1aad

Wakii la oggoladay in Sharikadda Nucleare Somala loo cusbooney-siiyo muddo hal sano ah ruqsadda Baarista Macdanta ka bilaabata 2 Maajo 1975.

### Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka.

Muqdisho, 9 Junyo 1975.

GUDDOONSHAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA  
*Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre*

---

## XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

Tr. 14 Abriil 1975, L. 88.

Billad Maar ah oi Hawikarnimo ee lagu Maamuusay Iskaashiga Shirkadda C.A.T. (Contracting and Trading Company).

## GUDDOOMIYAHA

### GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashida Koowaad iyo tan Labaad ee Kacaanka;

MARKUU ARKAY Sharciga tirsigiisu yahay 1 ee soo baxay 21 Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Sharciga tirsigiisu yahay 65 ee soo baxay 18 Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYEEY Sida hawlkarnimada iyo xilkasnimada leh ee Iskaashiga Shirkadda C.A.T. (Contracting and trading Company) ay ku hirgeliyeen mashuuca biyaxireenka Gacan Barwaaqo ee Degmada Hargeysa;

MARKU ARKAY Lagama maarmaan inay tahay in Shirkadda kor ku qoran oo ka geysatay kaalin weyn dhismaha iyo horukaca dhaqaalaha Dalka ay ka mudan tahay Ummadda aqoonsi gaar ah;

WUXUU GNDDOOMIYAY

Qodobka Keliya

Iskaashiga Shirkadda C.A.T. (Contracting and trading Company) waxaa lagu maamuusay Billad Maar ah oo Hawlkarnimo.

Muqdisho, 14 Abriil 1975.

GUDDOOMIYAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA  
*S. Gaas Jaalle Maxamed Siyaad Barre*

---

WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

Tr. 14 Junyo 1975, L. 89.

Magacaabidda Guddiyada Kacaanka ee Gobolka Sanaag Qaybafida Wakiilada Beesha.

XOGAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY Sharciga Lambarkiisu yahay 52 ee 8-6-1972ka lagu naadiyey Faafinta Rasmiga ah ee 21-9-1972kii, ku saabsan Maamulka Dawladda Hoose;

ISAGOO ARKAY Xeerka Wasaaraddan lambar 12126 ee 13-12-72 oo hore hoogu magacaabay Guddiyada Kacaanka Degmooyinka Gobolka Burco oo ay ka tirsan jireen Degmooyinka Cerigaabo, Laas Qoray iyo Gar-Adag;

ISAGOO ARKAY Xeer Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka lambar 66, taariikh 23-1-1973kii, lagu qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda ee 15-7-1973kii, lambar 13 Bis ee lagu dhisay Bobollada Sanaag iyo Galgaduud oo ay Magaala-Madaxdu kala yihiin Cerigaag iyo Dhuusa Mareeb;

ISAGOO ARKAY Xeer Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka Lambar 50 taariikh 4-12-1974ka oo Magaalo-Madaxda Degmooyinka Laas-Qoray iyo Gar-Adag loogu kala raray Badhan iyo Ceel Afweyne;

ISAGOO OGAADAY Iney lagama maarmaan tahay in la cusbooneysiyo Magacaabidda Guddiyada Kacaanka ee Degmaayinka Cerigaabo, Badhan iyo Ceel-Afweyne, iyadoo la waafajinaayo qaanuunka ku qoran Qodobka 10aad lambarkiisa 3aad, Xarafka (c) ee Sharciga kor ku tilmaan;

ISAGOO TIXGELINAYO Talada uu soo jeediyay Guddiga Kacaanka ee Gobolka Sanaag;

## WUXUU XEERAY

### Qodobka 1aad

Magacawga Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka Cerigaabo, Baddhan iyo Ceel-Afweyne qaybahooda Wakiiladda Beesha.

Ka bilaabanta 20-10-1974kii, dadka Magacyadoodu hoose ku taxan yihiin, waxaa loo magacaabay iney noqdaan xubno Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka ay ku hoos qoran yihiin:

### DEGMADA CERIGAABO

1. Jaalle Jibriil Xaaji Ducaale;
2. » Maxamed Cali Nuur (Gurey);
3. » Cutiya Cali Faarax;
4. » Faaduma Biixi Cadeed;
5. » Maxamed Xaaji Ducaale;
6. » Bashiir Maxamuud Maxamed;
7. » Sheekh Maxamed Cilmi Arboogeys;
8. » Axmed Ismaaciil Cigaal;
9. » Saleebaan Jibrile Maxamed;
10. » Cali Cabdi Nuur;
11. » Xasan Cabdi Warsame;
12. » Caasha Cabdi Maxamed;
13. » Cali Jaamac Colaad (Maydh);
14. » Warsame Jaamac Cali (Yufle);
15. » Cabdi Shire Diiriye;
16. » Xasan Sheekh Xaaji Ducaale (Xiis);
17. » Maxamed Shire Cabdi (Mirashi);

### DEGMADA CEEL-AFWEYNE

1. Jaalle Sheekh Cabdiraxman Ibraahim;
2. » Macallim Ciise Xasan;
3. » Saleebaan Cali Xasan;
4. » Aw Daahir DucaaleCali;
5. » Maxamed Cabdulle Sugulle;
6. » Cismaan Faarax Maxamed;
7. » Hodon Jibriil Xasan;
8. » Fadumo Saalax Axmeed;
9. » Saalax Axmeed Ismaaciil;

DEGMADA BADHAN

1. Jaalle Jaamac Faarax Nuur;
2. » Axmed Shirwac Cumar;
3. » Saciid Xaaji Axmed;
4. » Ismaaciil Haxamuud Cali;
5. » Aden Cabdi Jaamac;
6. » Maryan Maxamed Aaden;
7. » Lool Cali Ismaacil;
8. » Maxamed XasanSaalax;
9. » Cumar Cabdi Cali.

Qodobka 2aad

*Dhaqan Gal*

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa ka bilaabanta 20-10-1974kii, waana in lagu qore Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka.

Muqdisho, 14-6-1975.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda  
Arrimaha Gudaha  
*S. Gaas Jaamac Maxamed Qaalib*

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY

*Diiwaanka Lamb. 1, Bogga Lamb. 86.*

*Muqdisho, 16-6-1975.*

*Hantidhawraha Guud*

G. Dhexe Cabdullahi Warsame Nuur

---

## WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

Tr. 14 Junyo 1975, L. 90.

Magacaabidda Guddiyada Kacaanka ee Gobolèa Togdhere Qaybahooda Wakiiladda Beesha.

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tana 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY Sharciga lambarkiisu yahay 52 ee 8-6-1972ka, lagu naadiyey, Faafinta Rasmiga ah ee 21-9-1973kii ku saabsan Maamulka Dawladda Hoose;

ISAGOO ARKAY Xeerka Wasaaradda oo lambarkiisu yahay 12126 taariikh 13 Disember 1972kii, ku saabsan magacaabidda Guddiyada Kacaanka ee Gobolka Togdheere — qaybtiisa Wakiiladda Beesha;

ISAGOO OGAADAY Ine lagama maarman tahay in le cusbooney-siiyo Magacaabidda, Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka Oodweyne, Buuhodle, Sheekh iyo Barco, iyadoo la waafajinaayo qaanuunka ku qoran qodobka 10aad lambarkiisa 3aad, xarafka c) ee Sharciga kor ku tilmaan;

ISAGOO TIGELINAYA Talada uu soo jeediyey Guddiga Kacaanka ee Gobolka Togdheere;

## WUXUU XEERAY

### Qodobka 1aad

Magacawga Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka Oodweyne, Buuhodle, Sheekh iyo Burco qaybahooda Wakiiladda Beesha.

Ka bilaabanta 20-10-1974, dadka magacyadoodu halkan hoose ku taxan yihiin, waxaa loo magacaabay iney noqdaan xubno Guddiyada Kacaanka ee Degmooyinka ay ku hoos qoran yihiin:

## DEGMMADA BURCO

1. Jaalle Cabdi Cawil Jaamac;
2. » Xaajiya Dhabo Xersi;
3. » Khadra Cali Xersi;
4. » Salaad Xasan Axmed;
5. » Xuseen Xaaji Moxamed Jaamac;
6. » Aamina Abokor Guuleed;
7. » Cabdiraxmaan Jaamac Ceynanshe;
8. » Cali Maxamed Jaamac;
9. » Jaamac Aaden Xasan;
10. » Xaaji Haybe Dube;
11. » Xariir Sheekh Cismaan Nuur;
12. » Maxamed Xuseen Aaden;



13. » Cadar Xasan Xuseen;
14. » Aaden Xaaji Jaamac;
15. » Cali Cilmi Xayd;
16. » Baasha Xaaji Xasan;
17. » Sheekh Xasan Geelle;

#### DEGMADA ODWEYNE

1. Jaalle Macallim Axmed Maxamuud;
2. » Xasan Qaasali Samakaab;
2. » Shukri Xaaji Cabdullahi Maxmed;
4. » Maxamud Jaamac Bulaale;
5. » Maxamed Biixi Cabdi;
6. » Ibrahim Xaaji Maxamed Cabdikariim;
7. » Moxamuud Ibrahim Maxamed;
8. » Xaaji Faarax Obsiiye;
9. » Yuusuf Cabdullahi Xamar;
10. » Shaakir Xaaji Ismaaciil;
11. » Sheekh Aaden Jawhar Axmed;
12. » Maxamed Nuur Ibrahim;
13. » Faaduma Jaamac Aaden.

#### DEGMADA BUHODLE

1. Jaalle Xaaji Xuseen Xaaji Maxamed;
2. » Xaaji Jaamac Ducaale Faarax;
3. » Xersi Ducaale Muuse;
4. » Xaaji Nuur Ciise;
5. » Cosob Cali Cumar;
6. » Xaaji Maxamed Xuseen;
7. » Haybe Aw Cali Gurey;
8. » Hurre Ibrahim Warsame;
9. » Khadija Cabdullahi Iicir;
10. » Moxamud Cali Rooble;
11. » Maxamuud Samatar Nuur;
12. » Cabdi Bullale Maxamed;
13. » Maxamuud Daahir Xaydle.

#### DEGMADA SHEEKH

1. Jaalle Sheekh Aaden Xasan Kulmiye;
2. » Cabdi Xasan Bullaale;
3. » Xuseen Xaaji Xasan;
4. » Maxamed Axmed Carraale;
5. » Ibrahim Xuseen Cabdi;
6. » Aamina Xuseen Axmed;
7. » Yusuf Carrale;

8. » Xaaji Cabdiraxmaan Maxamed Cali;
9. » Macallin Xuseen Maxamed.

Qodobka 2aad

*Dhaqan Gal*

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa ka bilaabanta 20-10-1974kii, waana in lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka.

Muqdisho, 14-6-1975.

Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda  
Arrimaha Gudaha  
*S. Gaas Jaamac Maxamed Qaalib*

**WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY**

*Diiwaanka Lamb. 7, Bogga 87.*

*Muqdisho, 16-6-1975ka.*

*Hantidhawraha Guud*

G. Dhexe Cabdullahi Warsame Nuur

---

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

Tr. 30 Marso 1975, L. 91.

Dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay (Concessione e conseguente libera disponibilità) Jaalle Xaaji Maxamed Cabdulle Wardhere, mq. 351 iyo Cad dhul Dowladeed, la siiyay Jaalle Maxamuud Geedi Maxamuud mq. 378.

**XOGHAYAHA DAWLADDA**

ISAGA OO ARKAY Warqaddii Kowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Qaynunkii Kowaad ee 21 Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 144 soona baxay 23 kii Maajio 1961;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu keensaday Maxamuud Geedi Maxamuud taarikhdu markay ahayd 26 Oktoobar 1960 kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dawladeed, ku yaal Muqdisho — Xaafadda Hawl — Wa-daag;

ISAGA OO AQOONSAN Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ofgeysiis ahaana loogu dhajiyay looxa Dowlada Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmaiga ah ee Dowladda Suppl. 1-4 taarikhdeeduna aheyd 10-10-1962, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda L. 11645, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho, fadhigoodii 339aad taarikhdeeduna aheyd 8 Settembre 1964;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 19940 taas oo beddeshay mi-dii hore oo lambarkeedu ahaa 11645 laguna aqoonsaday fadhigii 2<sup>o</sup>aad ee guddiga dhismaha Dowladda Hoose, tarikhdu markay ahayd 26-1-1971, kuna saabsaneed dhismo guri;

ISAGA OO ARKAY Bolleetada lamb. 42097 ee 14-6-1965, kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Maxamuud Geedi Maxamuud uu bixiyay lacag dhan Sh. So. 729, kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO AQOONSAN dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 729 loona tiriyay Maxamuud Geedi Maxamuud sida ku cad xaashid ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegna) taarikhdeeduna ahayd 28 Agosto 1965;

ISAGA OO ARKAY Xaqiijinta farsamada ka tirsan Waada Dhismaha iyo Dhulka, aariikhdeedina aheyd 12-2-1975 taas soo caddeynesha in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar L. 19940 ee 26-1-1971 laguna haqiijiyay sida ay naqshadda guriga waafaqsan tahay;

ISAGA OO ARKAY Oggolaanta (Nulla Osta di abitabilità) dagganaashada guriga ku dhisan Xamar Xaafadda Hawl-Wadaag laguna siiyay xaashid lamb. 129 ee 8 Feb. 1975 ee Dowladda Hoose ee Xamar;

ISAGA OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameysa dhulka isaga ah;

ISAGA OO ARKAY Oqraal (Atto) lamb. 1159 Reb. taarkh. 26 Abril 1970, lagu diiwaan geliyay Xamar 28-4-1970 lamb. 365, qoraal Dowladeed, buuga 19 oo ah Caddeynta Notayada Dott. Muuse Xusen Saadiq taas oo Maxamuud Geedi Maxamuud ka gaday kuna wareejiyay Maxamed Cabdulle Wardheere wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul ah oo ku fadhiya mq. 351 kuna yaal Muqdisho — Xafadda Hawl — Wadaag;

ISAGA OO AQOONSAN in la tixgeliyay wax allaale wiixi waajib ahaa, kuna saabsanaa siismaha iyo gacan u gelinta dhulka Dowladeed ay ujeeddadiisu aheyd dhis, wuxuu soo saaraya;

## X E E R

B) — Waxaa dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay, (Concessione e conseguente libera Disponibilità) loona aqoonsaday Xaaj Maxamed Cabdulle Wardheere, dhul ku fadhiya mq. 351, kuna yaal Muqdisho — Xafadda Wawl — Wadaag.

T) — Waxaa cad dhul Dowladeed ah la siiyay Maxamuud Geedi Maxamuud oo ku yaal Muqdisho, Xafadda Hawl — Wadaag kuna fadhiya mq. 378.

Muqdisho, 30 Marso 1975.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud

*Inj. Maxamed Xawaadle Madar*

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY

*Diiwaanka lamb. 1, Bogga lamb. 9.*

*Muqdisho, 13 Abril 1975.*

*Hantidhawraha Guud*

G, Dhexe Cabdillahi Warsame Nuur

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Tr. 26 Majio 1975, L. 92.

Qaadid korontada Degmada B. Burde Dan Guud awgeed ee waqti hore uu lahaa Maxamed Axmed Saalax oo ay la wareegtay Wakaaladda Xoogga Korontada Ummadda.

## XOGHAYAHA DAWLADDA

MARKII uu arkay xaashida 1aad ee Golaha Sare ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969kii;

MARKII uu arkay xaashida 2aad ee Golaha Sare ee Kacaanka;

AQOONSADAY markii uu aqoonsaday baahida loo qabo Korontada Degmada B. Burdo, oo uu lahaa nin ganacsato ah lana yiraahdo Maxamed Axmed Saalax, in lagala wareego Korontada Dan Guud awgeed;

MARKII uu aqoonsaday qiimaynta Farsamayaqaanada Wasaaradda Hawlaha Guud, kuna soo qiimeeyeen lacag tirsigeedo dhan yahay Sh. So. 99.540,00, eeg xaashida taarikhdeeduna tahay 20-2-1972;

MARKII uu aqoonsaday xaashida guddiga Farsamayaqaanada Wasaaradda Hawlaha Guud ee matorada taarikhdeeduna tahay 30-1-1973;

MARKII uu aqoonsaday xaashida G. K. ee Degmada B. Burde, lamb. yahay 136 ee 12-2-1973 uuna kagala wareegey Korontada Baalayaasha, xarkaha Guriga iyo alaabada kale ee Korontada;

MARKII uu arkay warqadda lamb. yahay WDH-0-3-726 taarikhdeeduna ahayd 2-4-1975, ee ay soo qortay Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo ay ku weydiisaneyso in loo sameyo xeer;

ISAGA OO ARKAY Warqadda ee ay soo qortay Wakaaladda Xoogga Korontada Ummadda taarikhdeeduna ahayd 13 Abriil 1975;

## X E E R

Waxaa la caddeynayaa in loo qaaday Dan Guud awgeed Korontada Degmada B. Burde uu lahaa Maxamed Axmed Saalax, iyadoo loo celinayo maqdhaw gaaraya Sh. So. 99. 540,00 sida ay muujinayso warqadda qiimayntu.

Lacagta maqdhawga waxaa laga siinayaa Miisaaniyada Madax 1.2.0. Madax xige 1, 2, 8 (d) Kaalmadda Kaydka ah.

Muqdisho, 26 Majio 1975.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud

*Maxamed Kawaadle Xaaji Madar*

Xoghayaha W. Arrimaha Gudaha  
*S. Gaas Jaamac Maxamed Qaalib*  
Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda  
*Cabduraxmaan Nuur Xersi*

WAAN ARAGNAY EE DIIWAAGNELINAY

*Diiwaanka lamb. 1, Bogga lamb. 82.*

*Muqdisho, 1 Junyo 1975.*

*Hantihawraha Guud*

*G. Dhexe Cabdillahi Warsame Nuur*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Tr. 27 Majio 1975, L. 93.

Cad dhul Dowladeed, la siiyay Jaalle Saciid Xaaji Maxamed Bilcil iyo Ismaaciil Xaaji Maxamed Muusa ku yaal Muqdisho — Jdka Afgooye kuna fadhiya mq. 3.460.

## XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGA OO ARKAY Warqaddii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 144 soona baxday 23 Maajio 1961;

ISAGA OO ARKAY Arjigii keensaday Xaaji Cabdio Ibrau taarikhdu markay aheyd 19-10-1963 kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho — Xaafadda Hodan — Km. V — kuna dhacaaya qaybta VII Esterno;

ISAGA OO AQOONSAN Naadada dhulka kuna saabsan cad dhul ah, weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, lamb. 10-12 soona baxday 30-12-1963 iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 1297, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho, fadhigoodii 10<sup>aad</sup> taarikhdeeduna aheyd 14 Maajio 1968;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 4878 taas oo beddeshay midii hore oo lambarkeedu ahaa 1297 laguna aqoonsaday fadhigii 24<sup>aad</sup> ee guddiga dhismaha Dowladda Hoose, taarikhdu markay aheyd 22-12-1974, kuna saabsaneed dhismo guri;

ISAGA OO ARKAY Bolleetada lamb. 111463 ee 7-8-1968, kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Xaaji Cabdio Ibrau uu bixiyay lacoag dhan Sh. So. 1.730, kuna saabsan qii-maha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO AQOONSAN dhulka la weydiistsay, kuna fadhiya mq. 3.640, loona tiriyay Xaaji Cabdio Ibrau sida ku cad xaashid ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegna) taarikhdeeduna aheyd 21 Agosto 1968;

ISAGA OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) L. 1208 Reb. taarikh. 21 Nofembre 1968 lagu diiwaan geliyay Xamar 12-1-1969 L. 37, qoraal Dowladeed Buugga 19 oo ah caddeynta Notaayada Cabdalla Xaaji Faarax taas oo Xaaji Cabdio Ibrau ka gaday kuna wareejiyay Xalima Maxi Yero wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan dhismihii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 3.460. kuna vaal Muqdisho — Km V.

ISAGA OO ARKAY Qoraal (Atto) L. 14996 Reb. taarikh. 3-12-1974 lagu diiwaan geliyay Xamar 3-12-1974 L. 349 Qoraal Dowladeed Buuga 20 oo ah caddeynta Notaayada Dr. Xasan Warsame Cali taas oo Xalima Maaxi Yarou ka gadatay kuna wareejiisay Saciid Xaaji Maxamed Bilcil iyo Ismaaciil Xaaji Maxamed Muusa wax allaale wixii xuquq ah oo ku saabsan dhismihii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 3.460 kuna yaal Muqdisho — Km. V;

**X E E R**

Waxaa cad dhul Dowladeed ah la siiyay Saciid Xaaji Maxamed Bilcil iyo Ismaaciil Xaaji Maxamed Muusa oo ku yaal Muqdisho — Km. V, kuna fadhiya mq. 3.460.  
Muqdisho, 27 Majio 1975.

*Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud  
Inj. Maxamed Xawaadle Madar*

**WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY**  
*Diiwaan:ka lamb. 1, bogga lamb. 15.*  
*Muqdisho, 9 Junyo 1975.*  
G. Dhexe Cabdillaahi Warsame Nuur

---

**TALOOYIN ISGARSIIIN OGEYSIIS IYO WAXII LA MID AH**

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

**N A A D A D H U L**

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Xaaji Saciid, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 13-3-1975, uu ku weydii-sanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan 5° Km., oo leh qiyaas rektangolaar ah 40x30 kuna fadhiya 1200 mdh.  
Soohdin:

Waqooyi waxa ka: Lootka lamb. yahay 43k. 44k.  
Koofur waxaa ka xiga: Waddo.

Galbeed maxaa ka xiga: Waddo.

Bari maxaa ka xiga: Lootka lamb. yahay 33k.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 16 Junyo 1975.

*Mamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka  
Maxamed Cabdi Saciid*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Bibi iyo Binti Xaaji Abuubakar Xaaji Cumar, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii 19-4-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Shibis, oo leh qiyaas labo rektangolaar  $17 \times 6 + 11 \times 3 = 135$ , kuna fadhiya 135 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: dhul jaalleyaashaas horoy loo siiyay oo ayagu leeyihi.

Koofur waxaa ka xiga: dhul jaalleyaashaas horay loo siiyay oo ayagu leeyihi.

Galbeed waxaa ka xiga: dhul jaalleyaashaas horay loo siiyay oo ayagu leeyihi.

Bari waxaa ka xiga: jaalleyaashaas horay loo siiyay oo ayagu leeyihi.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 16 Junyo 1975.

Mamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka  
*Maxamed Cabdi Saciid*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaaji Maxamed Guuleed Cabdi, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii 22-5-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Waaberi, oo leh qiyaas rektangolaar  $11,50 \times 16$ , kuna fadhiya 184 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: dhul dad leeyahay.

Koofur waxaa ka xiga: dhul dad leeyahay.

Galbeed waxaa ka xiga: dhul dad leeyahay.

Bari waxaa waxaa ka xiga: Waddo.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 16 Junyo 1975.

(98)

Mamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka  
*Maxamed Cabdi Saciid*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xuseen Yusuf Maxamuud, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 21-4-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Yaaq-Shiid, oo leh qiyaas rektangolaar 20x23, kuna 460 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Lootka lamb. yahay 2.

Koofur waxaa ka xiga: Lootka lamb. 4.

Galbeed waxaa ka xiga: Lootka lamb. yahay 7.

Bari waxaa ka xiga: Waddada Balcad.

kooLootkala

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 16 Junyo 1975.

Mamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka  
*Maxamed Cabdi Saciid*

(99)

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xuseen Xaaji Maxamed, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii 15-7-1972, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hawl-Wadaag, oo leh qiyaas rektangolaar 15x13, kuna fadhiya 195 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Baabu-Raqiis.

Koofur waxaa ka xiga: Barxad (Piazza).

Galbeed waxaa ka xiga: Jidka Hawl-Wadaag.

Bari waxaa ka xiga: Xasan Cumar.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 16 Junyo 1975.

Mamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka  
*Maxamed Cabdi Saciid*

(100)



WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Xuseen Ibraahim, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 3-6-1975, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hawl-Wadaag, oo leh qiyaas rektangolaar ah 27x13,50, kuna fadhiya 354,50 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koofur waxaa ka xiga: Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo.

Bari waxaa ka xiga: Dhul dawladeed.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulka waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 16 Junyo 1975.

(101) Mamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka  
*Maxamed Cabdi Saciid*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

N A A D A D H U L

Anagoo tixraaceyana warqadda lambarkeedu yahay WHG-3-23-239 ee taariikhdeedu ahayd 28-4-1974, laguna soo diray naado dhul ku yaal degmada Afgooye soora weydiistay jaalle Axmed Rooble Gabeyre.

Waxaan caddeyneynaa in dhulaasi u qaybsan yahay laba cad oo qaabkoodu yahay rektangolaar addimohooduna yihiin  $28,20 \times 13,60 = 383,52$  iyo  $5,50 \times 10,70 = 58,85$  mdh, kuna fadhiya dhamaan  $442,37 =$  mdh ee ma aha sida khalad ahaanta loogu soo qoray naadadaas lagu soo diray warqadda aan tix raaceyno.

Muqdiscio, 4 Junyo 1975.

(102) Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka  
*Maxamed Cabdi Saciid*